Adeegyadda Guryaha Dhaqan-celinta La Degan Yahay

Waddooyinka Loo Maro Daaweynta Dhaqan-celinta.

Ma Dhaqan-celin baad ka Fikireysaa?

↓ ↓ ↓

La xiriir Adeegga Wax Si Xun u Isticmaalka	La hadal: Qofka Shaqaalaha ah ee Maandooriyaha ama Qamriga qaabilsan Kuruud-bixinta GP-ga Shaqaalaha Caafimaad	Ka qeyb gal kullan wargelin bil walba la qabto

↓ ↓ ↓

U sii gudbinta Adeegga Daryeelka Wax si Xun u Isticmaalka Lagu Aaminta Sheffield

↓

Qiimeynta ayaa la Bilaabayaa

Kullanada Wargeinta Bil Walba La Qabto

Kuwan waxaa glagu qabtaa goobta Turning Point marka ay tahay 3.00 alabnimo ee Isniinta bil walba ugu horeysa. Waxa aad heli doontaa fursad aadshaqaalaha iyo kuwa tabarucaada ku shaqeeya kula hadasho, oo aad wargelin dheeraad ah iyo su'aalahaaga jawaabo ugu hesho.

0114 275 5973
44 Sidney Street, Sheffield S1 4RH
Dhamaan Soo Dhawaada

Adeegyada Sheffield ee Daaweynta Maandooriyaha & Qamriga

Ma dooneysaa in aad wax bandan sii ogaato?

Kuwani waa qaar kuwa Waxtarka leh ee Lala Xiriiro ka mid ah:

Saraakiisha Wax Dib-u-eegista ee Lagu Aaminta Daryeelka Sheffield:	Tel: 0114 3050500 Email: rehabinfo@sct.nhs.uk Website: www.sct.nhs.uk
Beverley Sprague	
Brendan Wood Kooxda Wax ka Qabadka Maandooriyaha & Qamriga Sheffield	Tel: 0114 273 6851 Website: www.sheffielddaat.org.uk
Wakaaladda Qaranka ee Daaweynta	Website: www.nta.nhs.uk

(Space for 4 logos)

Kani waa mid ka mid ah buug-yareyaal tirro oo taxane ah oo ku saabsan daaweynta maandooriyaha & Qamriga, waxaana soo saarey Kooxda Wax ka Qabadka Maandooriyaha & Qamriga Sheffield oo maalgelin ka helaya Wakaaladda Qaranka ee Daaweynta . Waxa aan jeclaan laheyn in aan qirno caawinaada ay soo saaridda buug-yarahan siiyeen Isticmaaleyaasha Adeegga Sheffield ee Mashruuca Tabarucaadda iyo Saraakiisha Wax Dib-u-eegista.

(Space for logo)

Adeegyadda Guryaha Dhaqan-celinta La Degan yahay ee Sheffield ee loogu tallogalay isticmaaleyaash Maandooriyaha iyo Qamriga

Luqado kale

Qaab buug-yarahan ah ayaa lagu heli karaa afafka kala ah:
Carabi, Urdu, Soomaali, Faarsi, Burtuqiis, Boolish, Fransiis iyo Kurdi oo ku qoran website-ka DAAT ee: www.sheffielddaat.org.uk/
Qaab far waaweyn ah ayaa isla goobtan laga heli karaa.

Adeegyadda Guryaha Dhaqan-celinta La Degan Yahay

Waa Maxay Dhaqan-celin (Rebah) ?

Rehab waa soo gaabinta Residential Rehabilitation (Guryaha Dhaqan-celinta La Degan Yahay). Waa barnaamij daaweyn ah oo loogu tallogalay dadka ay heystaan dhibaatooyinka maandooriyaha iyo qamriga. Inta badan waxaa jira warar sheegaya dad caan ah oo rehab galaya, laakiin meesha tujaarta iyo kuwa caanka ah uun looguma tallogalin. Waa mid ka mid ah daaweynta ay heli karaan dadka Sheffield ay heystaan dhibaatooyinka maandooriyaha iyo/ama qamriga.

Rebah ayan galay Jan '07. Fursad kale ayey nolosha ii siisey maxaa yeelay waxaan u baahnaa inaan wax ka qabto sida aan dabinka maandooriyaha ugu dhacey. Hadda waxaan ku noolahay nolol maandooriye ka xor ah. *

Rehab-ka sidee u eg yahay?

Waxaa jira noocyo kale duwan oo rehab oo baahida kala duwan wax loogu qabanayo. Dadka intiisa badan waxa ay u baahan yihiin in lagu caawino doorashada rehab-ka sida ugu fiican baahidooda wax uga qabanaya.

Waxaa jira meelo wadanka ku baahan oo rehab laga helo. Dadka Sheffield badanaa waxa ay tagaan meel Sheffield ka baxsan maadaama la cadeeyey in ay u fiican tahay in ay ka fogaadaan halka ay dhibaatooyinka ku heystaan.

Dhamaan goobaha rehab-ka waxa ay ka qeybgaleyaasha uga baahan yihiin maandooriyaha iyo/ama qamriga ka joogsadaan inta uu barnaamijka u socdo. Dadka u baahan in ay sunta iska saaraan ka hor inta aysan rehab-ka aadin waxa ay caawinaad ka heli karaan Adeega Wax Si Xun U Isticmaalka Sheffield.

Caadi ahaan barnaamijka waa mid si xawli ah u socda oo ka qeybgaleyaasha waxa ay u baahan yihiin in ahaadaan kuwo fikradahooda, dareenkooda iyo niyadooda si daacad ah oo furfuran u soo bandhiga.

Rehab ma tahay mid aniga ii haboon?

Rehab waa mid ka mid ah tirro daaweyn ah oo la heli karo. Waxaa dhici karta in ay ku haboon tahay dadka awoodi waayey in ay dhibaatooyinka heysta wax ka qabtaan inta ay beesha ku dhex nool yihiin.

Ujeedada ugu weyn ee rehab waa in dadka lagu caawino ku noolaanshaha nolol aan la heyn si dhibaato leh u isticmaalka maandooriyaha iyo qamriga.

Rehab ayaa igu kaalmeysey ogaanshaha qofka aan dhabtii ahay. *

Isweydii su'aalahan :

• Ma rabaa in aan joojiyo isticmaalka maandooriyaha iyo qamriga?
• Ma isku deyey iska jooyinka isticmaalkooda laakiinse ma aad bay iigu adkaatay?
• Ma u baahanahay in aan nolosheyda wax iska bedel weyn ku sameeyo?
• Ma jeclaan lahaa la hadalka dad xaaladeyda oo kale ku sugan, si ay iigu caawinaan waxka qabadka dhibaatada iga heysata maandooriyaha/qamriga?
• Ma u baahanay siyaabo cusub oo aan nolosheyda u eego?
• Ma u diyaar ahay in aan eego sababaha ay ii heystaan dhibaatooyinka maandooriyaha/qamriga?
• Ma u diyaar ahay in aan Sheffield ka maqnaado waqti mudo ah – ama aaba si aan ku soo noqod laheyn uga tago?

Inta badan ma HAA baad ku jawaabtay? Waxaa dhici karta in Rehab kuu haboon tahay. Sii akhri….

Ma Xgga?

Haddii ay kula tahay in ay Rehab tahay midda kuugu haboon, waxa aad la hadli kartaa mid dadkan ka mid ah:

• Qofka shaqaale maandooriye ama qamri ah
• Sarkaalka Kuruud-bixinta (Probation Officer)
•Qof Shaqaale Caafimaad ama GP ah
• Qof Shaqaale Bulsho ah

Waxa ay kuu sii gudbin karaan Adeega Daryeelka Wax Si Xun U Isticmaalka
Ee Lagu Aaminta Sheffield si qiimeynta loo sameeyo. Tan waxaa lagu bilaabi doonaa 3 toddobaad gudahooda — ama, haddii aad xabsi ku jirto, qiimeynta waxaa loo diyaarin doonaa si waafaqsan taariikhda lagu soo deynayo.

Haddii ay rehab tahay wado kuu wanaagsan, qof Qiimeeyaha ah ayaa tallo kaa siin doona kuwa ay yihiin rehab-yada wax ka qabadka baahidaada aadka ugu wanaagsan.

Rehab waa qaali waxaana dhici karta in aad kaalmo maaliyadeed u baahato. The Qofka Qiimeeyaha ah ayaa kaala hadli doona maalgelinta ay dhici karto in la heli karo laakiin waa in aad ka warheysaa in aan helitaanka maalgelinta la hubin.

Waxaan bilaabey inaan nafteyda ka shaqeeyo iyada oo ay I caawinayaan waxna ii tilmaamayaan dad sideydaas oo kale uun ah. Ugu dambeyntii waxay silsiladii i reebeysey bilowdey inay kala furanto oo markii nolosheyda ugu horeysey baan horey u sii socday. *
**